Public Health Agency

# MEASLES

# JADEECO

## Astaamaha iyo daawaynta

**Jadeecada waa cudur fayras ah oo aad u faafa oo aad u xun oo mararka qaarkood qofka u horseedi kara dhibaatooyin daran. Tallaalka jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeeco jarmalka (MMR) waa mid aad waxtar ugu leh dadka si uu uga ilaaliyo inay qaadaan cudurka jadeecada (sidoo kale qaamo-qashiirka iyo jadeeco jarmalka).**

Qof kastaa waxaa ku dhici kara cudurka jadeecada haddii aan la tallaalin ama aanu hore ugu soo dhicin cudurka, inkasta oo ay ku badan tahay carruurta yaryar.

Caadi ahaan infekshanku wuxuu ku baaba'aa ku dhawaad 7 ilaa 10 maalmood.

## Astaamaha jadeecada

Astaamaha ugu horreeya ee jadeecada waxay soo baxaan qiyaastii 10 maalmood, laakiin waxay noqon karaan kuwo gaaban oo socda ilaa 7 maalmood ama kuwo socda wakhti dheer ilaa 21 maalmood, kadib markaad qaaddo cudurka. Astaamahaas waxaa ka mid ah:

- Astaamaha hargabka u eg, sida sanka oo duuf ka socda, hindhiso, iyo qufac;
- indho xanuun, indho cas oo laga yaabo inay u nugul yihiin/dhibsanayaan iftiinka;
- heerkulka jirka oo sareeya (qandho), kaas oo gaari kara ilaa 40$^{o}$C (104$^{o}$F);
- dhibco yaryar oo cawl-caddaan ah oo ka soo baxa gudaha dhabannada.

Dhowr maalmood kadib, waxaa qofka ka soo bixi doona finan guduudan oo casaan-bunni ah. Finankan waxay badanaa ka soo bilowdaan madaxa ama luqunta sare, kahor intaysan ku faafin dibadda jirka intiisa kale.

## Goorta ay tahay inaad u tagto GP-gaaga

Waa inaad sida ugu dhaqsaha badan ula xiriirto GP-gaaga haddii aad ka shakisan tahay in adiga ama ilmahaaga laga yaabo inaad qabtaan cudurka jadeecada.

Waa inaad wacdaa kahor intaada u tagin sababtoo ah waxaa laga yaabaa in GP-gaagu u baahdo inuu sameeyo qabanqaabooyin si loo yareeyo khatarta ah inaad caabuqa ku faafiso dadka kale.

## Cudurka jadeecadu ma yahay mid halis ah?

Cudurka jadeecada waxaa keena fayras aad u faafa oo sababa finan iyo qandho sareysa. Wuxuu sidoo kale noqon kartaa cudur halis ah.

Cudurka jadeecada wuxuu noqon karaa mid aan fiicnayn, laakiin badanaa wuxuu cudurka ku gudbaa qiyaastii 7 ilaa 10 maalmood gudahooda isaga oo aan wax dhibaato ah keenin. Ilmaha qaba cudurka jadeecada waa inuu sariirta jiifaa ilaa shan maalmood waxaana laga yaabaa inuu dugsiga ka maqnaado ilaa toban maalmood. Dadka waaweyn waxay u badan tahay inay la xanuunsan doonaan muddo dheer.

Si kastaba ha ahaatee, wuxuu sidoo kale noqon karaa cudur aad halis u ah oo keena dhibaatooyin halis gelin kara nafta dadka qaarkood. Qiyaastii hal ka mid ah 15ikii carruur ah ee qaba cudurka jadeecada waxay kala kulmi doonaan dhibaatooyin aad u daran. Dhibaatooyinkaas waxaa ka mid noqon kara caabuqa dhegta iyo laabta, shuban, encephalitis (cudurka maskaxda), iyo dhaawaca maskaxda. Cudurka jadeecada wuxuu noqon karaa dilaa.

Mar haddii ay jadeeco kugu dhacday, jirkaaga waxa uu samaysanayaa iska caabbinta (difaaca) fayraska oo aad uma badna in aad mar kale qaado cudurka.

## Sidee ayuu u faafaa cudurka jadeecada

Fayraska jadeecada wuxuu ka kooban yahay malaayiin dhibcood oo yaryar oo ka soo baxa sanka iyo afka marka qof cudurka qaba uu qufaco ama hindhiso.

Waxaad si fudud jadeecada u qaadi kartaa marka aad neefsato dhibcahan ama, haddii dhibcaha ay ku kor degaan sagxad, adigana aad taabato sagxadaas, kadiba aad gacmahaaga u dhaweeyso sankaaga ama afkaaga. Fayrasku wuxuu ku dul noolaan karaa sagxadaha ilaa dhowr saacadood.

Dadka qaba jadeecada ayaa laga qaadi karaa cudurka laga bilaabo marka ay astaamuhu ka soo baxaan ilaa afar maalmood kadib marka ugu horeysa ee finanku soo baxaan.

## Sidee cudurka jadeecada looga hortagi karaa

Jadeecada waxaa looga hortagi karaa in la qaato tallaalka jadeecada, qaamo-qashiirta iyo jadeeco jarmalka (MMR).

Tallaalkaan waxa loo bixiyaa laba qiyaasood ahaan oo qayb ka ah barnaamijka tallaalada la bixiyo xilliga carruurnimada. Qiyaasta/dooska koowaad waxa la bixiyaa wax yar uun kadib maalinta koowaad ee dhalashada ilmahaaga, qiyaasta labaadna waxaa la bixiyaa da’ada 3 sano iyo 4 bilood, kahor inta aanu ilmahaagu bilaabin dugsiga.

Dadka waaweyn iyo carruurta waaweyn ayaa la tallaali karaa da'a kasta haddii aan si buuxda loo tallaalin hadda kahor. GP'gaaga wax ka weydii qaadashada tallaalka.

# Daaweynta jadeecada

**Ma jirto daaweyn gaar ah oo loogu talagalay cudurka jadeecada, laakiin xaaladda waxay caadi ahaan ku soo fiicnaataa 7 ilaa 10 maalmood gudahood. GP-gaaga waxa ay u badantahay in uu kugula taliyo in aad iska joogto guriga ilaa aad ka soo roonaanayso.**

Ka fogow aadista shaqada ama dugsiga ugu yaraan afar maalmood laga bilaabo marka ugu horeysay ee finanka jadeecada soo muuqdeen si aad u yareyso halista ah inaad faafiso caabuqa.

Waa inaad sidoo kale isku daydaa inaad iska ilaaliso inaad u dhowaato/xiriir la samayso dadka aadka ugu nugul caabuqa, sida carruurta yaryar, haweenka uurka leh iyo dadka difaaca jirkoodu daciif yahay.

## Yareynta astaamaha

Haddii astaamaha cudurka jadeecada ay kuu keenayaan raaxo darro adiga ama ilmahaaga, waxaa jira waxyaabo aad samayn karto si aad astaamahaas u daaweyso inta aad sugayso jirkaaga inuu iska caabiyo fayraska.

**Xakamaynta qandhada iyo yaraynta/ baabi'inta xanuunka**
Paracetamol ama ibuprofen ayaa loo isticmaali karaa in lagu dhimo/yareeyo heerkulka jirka ee sareeya (qandhada) iyo in la yareeyo wixii xanuun ah haddii ilmahaagu dareemayo raaxo daro.

Paracetamol-ka dareeraha ah ee loogu talagalay dhallaanka ayaa loo isticmaali karaa carruurta yaryar. Aspirin waa in aan la siin carruurta ka yar 16 sano.

La hadal farmashiistahaaga haddii aadan hubin daawooyinka ku habboon ilmahaaga.

**Cab cabitaanno badan**
Haddii ilmahaagu qabo heerkul aad u sareeya, xaqiiji inay cabbaan dareere badan sababtoo ah waxay halis ugu jiraan fuuqbax.

Cabida dareere badan waxay sidoo kale kaa caawin kartaa dhimista raaxo-darrada laga dareemo cunaha taas oo ay sabab u tahay qufaca badan.

**Daawaynta indho xanuunka**
Waxaad si tartiib ah u nadiifin kartaa wixii faar/qolof ah oo ka soo baxa daboolka indhaha ilmahaaga adigoo isticmaalaya suuf biyo lagu qooyay.

Xiritaanka daahyada ama deminta iftiinka ayaa ku caawin kara haddii iftiinka aadka u ifaya uu dhaawacayo/dhibayo indhahooda.

**Daawaynta astaamaha kuwa hargabka u eg**
Haddii ilmahaagu qabo astaamo u eg kuwa hargabka, sida sanka oo diif ka socda ama qufac, waxaa jira dhawr waxyaalood oo aad samayn karto si aad uga caawiso inay dareemaan raaxo badan. Tusaale ahaan, waxaad shukumaan qoyan saari kartaa qalabka hiitarka ee diirran si aad u qoyso hawada, taas oo gacan ka geysan karta fududaynta qufaca ilmahaaga.

Cabbida cabitaannada diirran, gaar ahaan cabbitaanada ay ku jiraan liin ama malab, waxay sidoo kale kaa caawin karaan inay dejiyaan marinnada neef-mareenka, inay debciyaan xabka, iyo inay nugleeyaan qufaca. Malabka waa in aan la siin ilmaha ka yar 12 bilood.

## Ogaanshaha astaamaha jirrooyinka halista ah

Haddii adiga ama ilmahaagu aad qabtiin jadeeco, waa inaad isha ku haysaa wixii astaan ah oo muujinaya dhibaatooyinka halista ah ee mararka qaarkood soo bixi kara. Astaamaha dhibaatooyinka aadka u daran waxaa ka mid ah:

- neefta oo kugu yaraata;
- xanuun laabta ah oo fiiqan oo ka sii dara xilliga neefsashada;
- in la qufaco dhiig;
- dawakhaad;
- jahwareer;
- qarqaryo (gariir).

U tag waaxda xaaladaha degdega ah ee deegaankaaga ama wac 999 si aad u hesho ambalaas haddii adiga ama ilmahaagu aad isku aragtaan mid ka mid ah astaamahan.

Public Health Agency

**Public Health Agency**
12-22 Linenhall Street, Belfast BT2 8BS.
Tel: 0300 555 0114 (local rate).
www.publichealth.hscni.net
www.nidirect.gov.uk

Find us on:

Daabacaadan waxaa laga soo min guuriyay macluumaadka ay asal ahaan soo saartay Hay'adda Ammaanka Caafimaadka UK waxaana lagu isticmaalay shatiga Dowladda Furan v 3.0

Wixii macluumaad dheeraad ah kala xiriir GP-ga deegaankaaga ama booqo: www.nhs.uk/mmr

07/22